# Qorshaha Qoraalka Gaaban ee Hore ee Horumarinta Adeegga Baska ee Metro

## Hordhac

Adeegyada baska ee miradhalka ah waa qayb waxqabadka adag ee u baahan guul lagaga gaarayayo nidaamka gaadiidka Minneapolis-St. Paul(ta) weyn iyo nawaaxigooda. Adeegyada baska waxaa ka mid ah mariinada xaafadaha ee joogsiga badan leh, baska dheereeya ee rakaabka badan qaada ee mara meelo gaadiidka badan iyo gaadiid yar isu jira ee joogsiga yar leh (waadada BRT), iyo mariinnada ee qaasatan u badan inuu shaqeeyo saacadaha caadiga subaxnimo ee gaadiidka badan iyo saacadaha fiidnimo ee gaadiidka badan, kuwaaso sameeya joogsiyada yar.

Qoraal Diyariinta *Qorshaha Adeegyda Hagaajinta Gaadiidka Magaalada (Metro Transit Service Improvement Plan* - Draft SIP) wuxuu dhisayaa iskuxirka basaska waddooyinka mara ee jira iyo waxuu tilmaam ka bixinayaa fursado lagu kordhiyo marinno cusub iyo lagu kordhiyo xiriirka iyo dhererka adeegyada lana gaarsiiyo illaa iyo sanadka 2030. Qorshaha waxuu isku midaynaya naatiijooyinka iyo qaaciidada *Thrive MSP 2040,* himilooyinka iyo ujeeddooyinka *2040 Transportation Policy Plan*, aasaasyada qorsheynta gaadiidka iyo taageerada muhiimka ah ee dadweynaha ee lagu toosinayo adeegyada hagaajinta ee u bahaan dhaqaalaha halwgalinta ee dheeraad ah. Himilooyinka waxaa ku jira nidaamka hoggaaminta hawlgaka gaadiidka, nabadgalyada iyo amniga, helitaanka meelaha loo socdo, tartanka ugu jira macaashka, adeegyo hufan iyo ballaarinta suuqa, jawi caafimaad qaba, isku dhellitirka macaashka iyo maalgalinta gaadiidka ee lagu hagayo isticmaalka dhulka. Adeegyada baska ee la hagaajiyay waxaa maamuli doonaa Metro Transit ama shirkado madaxbannaan ee qandaraas ka haysta Metropolitan Council.

Warbixinta (Draft) SIP waxay soo jeedisay adeegyada basaska dheereeya ee xaafadda cusub ama la hagaajiyay e ka dhex shaqeeya adeegyada deegaanka Metro Transit iyo isusoo koobaya qorsheynta adeegyada waddooyinka BRT balse aan weli dhaqaalo loo hayn. Adeegyada waddooyinka (Arterial) BRT waxay ku jiraan qorshaha bacdamaa ilaha laga heli lahaa dhaqaalo dheeraada ee hawlgalka aan weli gacanta lagu hayn. Gaadiidka tareenka, tareenka fudud iyo waddooyinka waaweyn ee BRT ee la hagaajiyay kuma ay jiraan Warbixinta (Draft) Sip sababtoo ah qorshaha muddada dheer ee lagu fidinayo xiiriirada gaadiidka kala duwan ee deegaanka waxaa lagaga warbixinayaa Qorshaha Qaanuunka Gaadiidka (Transportation Policy Plan - TPP). Laakiin adeegyada iskuxiraya hagaajinta baska xaafadda ee taageeraya mashruucyadaan waa ay ku jiraan. Warbixinta SIP looguma talagelin in ay ahaato qorshe lagu hagaajinayo ama maalgalinayo gaadiidka oo dhammaystiran. Kuma ay jiraan magaalooyinka ka baxsan Metro Transit adeegyadeeda deegaanka iyo kuma ay jiraan maalgalinta lafaha raasamalka la xariira (gaadiidka, maacaamilka iyo dhismaha, hagaajinta sancada taageeraya, iwm).

Shanta nooc ee gaadiidka guud ka bixiya deegaanka Twin Cities, Metro Transit ayaa ah midka ugu ballaaran. TPP waxay uga baahantahay mid kasta ee gaadiid bixiyaha ah in ay saymasato SIP ay gaar u leedahay, kaddibna la shaqayso si loo mideeyo mashruucyada sanadaha hore ee SIP kasta ee lagu darayo Regional Service Improvement Plan (RSIP). RSIP waa qorshe affar illaa shan sanadood ee hagaajimada baska ku hagaya dhammaan bixiyaasha oo idil ee gobolka, waxaana la cusboonaysiin doonaa 2015.

## Isku Xirka Hore iyo ka Qaybgala Dadwaynaha

Metro Transit waxay soo si hordhac ah u soo aruurisay fikradaha ay qabaan dhinacyada howsha wada iyo dadwaynaha si lagu dhiso adeegyada hagaajinta ee qancinaya baahida gaadiidka jaalliyadda. Bandhigyo shaqo ee la qabtay dhammaadkii 2013 ayaa laysugu keenay madaxda jaalliyadda si lagu aqoonsado iyo muhiimad lagu siiyo danaha safarka jaalliyadda. Waxaa sii dheer, sahan ka qaybgalayaasha laga qaaday oo lagu weydiiyay inay ku sheegaan astaamaha adeegyada baska ee ayaga ku dhiirrigalinayo inay in badan raacaan gaadiidka baska, ay sheegaan in ahmiyadahooda adeegyada baska iyo sida ay ugu maalgalinayaan hagaajinta adeegyada gaadiidka haddii dhaqaalo dheeraada ah la helo. Dhinacyada daneeya iyo dadweynaha waxay soo gudbiyeen ku dhowaad jawaabo sahan ee 4,000 ah. Markii ay raadinaysa jawaabaha sahanka, Metro Transit waxay fiiro gaara siisay sida lagu aruurinayo fikradaha dadka badanaaba mudnaanshaha ka maqan. Fikradaha muhiimka ah ee sahanka lagu aruuriyaya waxaa ka mid ah:

- Tageero aqlabiyad ku dhawaad ee la siinayo fidinta adeegyada baska ee u adeegaya dadka inta badan raacitaanka baska ku xiran. Guudahaan, waxaa jirtey rabitaan lagu xoojinayo adeegyada hadda jira ee hadda degaannada ka shaqeeya marka la barbardhigo fidinta adeegyada deegaanno aanan waqtiga xaadiirka lahayn adeegyada gaadiidka.
- Ugu badnaansho muuqata ee jawaabayaasha waxay doorbideen istimcaalka gaadiidka ugu badnaan inta ay ka awoodi karaan iyo inay racitaankooda badinayaan haddii xiriirka gaadiidka la hagaajiyo.
- Marka gaari wadista ay tahay fursad uu haysto rukunka, nooca ugu badan ee saamaynta doorbididda ku yeeshay ayaa ah faraqa waqtiga ee u dhaxeeya tegitaanka iyo imaatinka gaari wadista iyo gaadiidka. Dabaqadaha la xariira isticmaalka gaariga, sida kharashka iyo helitaanka gaari-dhigashada iyo qiimaha shidaalka waxay kaloo ahaayeen arrimo muhiim ah.

## Hoggaanka ugu Muhiimsan

Metro Transit waxay israacisay jahada qaanuunka oo ay la socdaan waxtarka ujeeddoyinka iyo gaadiidka ee leysku dhaafsaday bandhigyada iyo sahanka, ee lagu aqoonsaday toddobada tiir ee lagu hagayo nidaamka horumarka SIP:

- La kordhiyo koritaanka rakaabnimada
- La xoog saaro mashruucyada waxsooraarka heerka sare iyo/ama kabiitaanka hooseeya leh
- La bixiyo waqti safar dheereeya leh
- La kordhiyo iskuxiritaanka nimaamka gaadiidka
- La tageero gaadiiyo u furfuran isticmaalka dhulka iyo ujeeddada
- La fidiyo adeegyada ujeeddoyinka xilliga socodku yaryahay iyo aan shaqo aadis la xariirin
- Lagu hagaajiyo gaadiika si eexla'aan ah

## Aqoonsashada Hab-nadaamyada Mashruuca

Metro Transit waxay isticmaashay dhowr ilood oo fikrado xagaajinta baska ay ka soo bixi karaan. Ilaha waxaa ka mida jawaabaha sahanka, hannanada codsashada socdaalka ee ka imaanaya xogta bilowga-dhammadka, fikradaha laga TPP, Thrive MSP 2040 iyo mashruuca gacansaarka transitway, codsiyada rukunka ay u gudbiyeen Metro Transit Customer Relation iyo RISP ee jira. Fikradaha xirfadlayaasha, ay ku jiraan macluumadka laga helay wakillada Transit Information Center, iyo xogta ka

soo baxday mashuurcyada kale qorsheynta (Thrive MSP  2040, TPP, qaybta daraasaadka) sido kale iyagana waa la eegay (considered).

Shaqaalaha Metro Transit waxay fikaradahaan ay la soo baxeen geliyeen hagaajinta marin qaas ah, qoondeyeen ilaha loogu baahnaa hagaajin kasta (tusaale, saacadaha adeegyada, xilliyada basas aad u shaqeeyaan), iyo waxa ay qiyaaseen rakaabka cusub ee hagaajinta kasta laga filayo inay dhaliso.

## Noocyada Hagaajimhaa Adeegyada

Mashruucyada waxaa lagu aqoonsadaa saddeex qaybood ee hirgalinta kuwaaso ku salaysan agaasimidda ama ku haynta heerarka raacitaanka, hannaanada isticmaalka dhulka ee hadda jira ama la filayo in la helo, iyo isuduwidda lala yeelanayo hirgalinta mashruuca transitway: 2015-2017, 2018-2020 ama 2021-2030. Hagaajnta shanta nooc ee adeegyada baska ayaa shaaca laga qaaday: meesha cusub ay ka shaqaynayaan, caddadka adeegyada oo la ballaariyay, gaadiid waqtiga ka dheereeya iyo adeegyada gaadiidka sii socoda/soo noqoshada ah. Mashruuca gaadiidka sii socodka/soo noqoshada waxuu ku xirayaa degganayasha jooga Minneapolis ama St. Paul shaqooyinka ay ka hayaan jaalliyadaha daafaha ku nool. Hagaajinno badan waxay qancinayaan haqaajinnada dabaqado kala duwan.

## Qaababka Wax Lagu Qiimaynayo

Qaanuunka deegaanka waxuu tilmaamayaa saddex qaab oo muhiima oo lagu qiimaynaya habka lagu mudnaan siinayo hagaajinta adeegyada baska. Wadajir, qaabka qimeynnadaan oo culeyska saaraya adeegyada waxqabadka baska, in la hubiyo sinnaanshaha bulshda iyo in si dheellitir ah lagu bixiyo sida uu degaanshaha yahay (geography).

Hababka waxqabashada waxay muujinayaan inay jiri karaan adeegyada raacitaanka rakaabka ee cufnaanshaha lagu sameynayo isticmaalka dhulka iyo xaaladda tiro badnaanhasha degganayaasha degaanka. Hababkaan marka dadwayanaha iyo shaqooyinka jira la eego, in Degaannada Ugu Shaqooyin Badan (Job Concentrations) loo isticmaalay bartilmaan ahaanta Thrive P 2040, in markaasi rakaabku u dhigma adeegyada saacaddiiba, kaalmada dhaqaalaha ee rakaabka iyo cufnaanta isgoysyada. Hababka waxqabdka waxay u dhigantahay boqolkiiba 50 ee dhibcaha wadarta laga hayo nidaamka qiimeynta.

Qaababka sinaanshaha bulshada waxaa lagu qiimeynaya sida ugu wanagsan oo ay hagaajimada wax u tarayaan dadka ku tiirsan gaadiidka. Hababka waxay noqdeen tirada shaqooyinka loo adeegayo oo lacagta sanadkii la qabto ay ka yartahay $40,000, tirada gawaarida la isticmaalo marka la barbardhigo dadwaynaha jira 16 sano ama ka weyn, iyo marriinada u adeega dadka danyarta ah, dadka madow, iyo dadka naafonimada qaba. Hababka sinnaanshaha la xariira waxay u dhigmaan boqolkiiba 25 ee dhibcaha qiimeynta.

Hababka nidaamka iskuxirnaashaa ayaa dajinaya sida ugu fiican ay u hagaagayaan isku xirnaanshannada mashruucyada iyo adeegyada deegaanka ay Metro Transit ka halwgasho. Hababka halka ay tirada isgoysyada marinnada ka jiraan, dadka ay marinnada cusub u adeegayso ama marinnada la sii fidshay, meelaha muhiimka ee uu gaarayo, Machadyada Waxbarashda (Educational Institutions) ee loo adeegayo ee lagu tilmaamay Thrive 2040 iyo saacadaha socodka gaadiidka yaryahay, waqtiga dhererka adeegyada iyo/ama hagaajimada aadista iyo soo noqoshada. Hababka nidaamka iskuxinaashaha waxay u dhigmaan boqolkiiba 25 ee dhibcaha qiimeynta.

Tusmada 1 waxay tilmaamaysa hababka qiimeynta, iyo qeexaya sida hab kasta lagu cabbiray, dhibcaha layska rabo iyo culeyska uu leeyahay cabbir kasta.

## Natiijooyinka Baaritaanka Bilowga Ah

Warbixinta ay SIP waxay bandhigaysaa natiijooyinka baaritaanka soojeedimada adeegyada hagaajinta baska ee deegaanka Metro Transit ka ka shaqeeya. Ayadoo la raacayo natiijooyinka qiimeynta, hagaajin kasta ee la soo jeediyay waxaa lagu kala cabbiray Sare, Dhexe ama Hoose (High/Medium/Low). Soo jeedimaha helaya ugu yaraan mudnaanshaha boqolkiiba 75 ee dhibcaha ayaa qaadanaya cabbirka Sare (High), Soo jeedimaha helaya ugu yaraan mudnaanshaha boqolkiiba 55 ee dhibcaha ayaa qaadanaya cabbirka Dhexe (Medium). Natiijooyinka xulashada bilowga ah waxay aqoonsatay 41 mashruucyo Sare iyo 81 mashruucyo Dhexe, kuwaaso mudnaansho u heli doona in la hirgaliyo marka loo eego dhaqaalaha gacanta lagu hayo.

Affartan iyo saddex (43) ayaa darajo Hoose mutaystay. Ayadoon aan lagu talin in waqtigaan xaadirka ah la hirgaliyo, mashuurcyadaan mustaqbalka ayaa dibloo qiimayn doonaa marka la sameeyo saadashaha tirada qoysaska degganayaasha ee 2040, qoysaska iyo shaqooyinka oo ay isticmaalaan jaaaliyadha xaafadaha kuwaaso lagu cusbooneysiiyay qorshayaasha wada dhan, ama isticmaalka horumarinnada dhul cusub la soo jeediyo.

Tusmada 1 waxuu muujinayaa hagaajimada idil ee la soo jeediyay xagga cabbir ahaanta. Shaxda 2 waa warbixinta qorshaha oo kooban, ay ku jirto warbixin gaaban ee mashruuc kasta iyo guudahaan halka uu cabbir ahaan ka taaganyahay. Shaxda 3 waxay muujinaysaa tafaashiisa ilaha iyo raaacitaanka rakaabka ee mashruuc kasta, heerka hirgalintiisa iyo dabaqadda hagaajinta adeegyada. Shaxda 4 waxay muujinaysaa sida mashruuc waliba dhibcaha loogu siiyay qiimeynta cabbiraadyada gaarahaaneed.

## Warbixinta Kooban ee SIP

122 mashruuc oo dhibcahoodu noqdeen Sare (High) ama Dhexe (Medium) oo mudnaansho u leh hirgalinta, 77 mashruucyo lagu fidinayo degaanno laga hawlgalo iyo la hagaajinayo xiriirka isku xirnaashaha, 71 lagu kordhinayo soo marmarka horay uga jiray mariinnada, iyo 62 ay wehliso adeegyada bilaabanaya waqti kii hore ka horreeya ee subaxnimo iyo/ama sii soconaya waqti dambe habeennimada, waxaa kalo jiro 14 mashruucyo gaadiid labada dhinac u kala goosha.

Horumarrada waxa loo wada qoorsheeyay gaadiidka mariinnada u kala soocda oo idil, sida lagu qeexay 2040 TPP:

- 50 mashruucyo ee mariinnada ugu muhiimsam, kuwaaso sal u ah qaabka isku xiraya xiriirka baska maalinka idil shaqeeya, kaaso dadka siinaya meel ku xiraysa xarumaha iyo xarumaha gaadiid ee hawlaha waaweyn.
- 33 maashruuc ee mariinnada uu baska dheereya maro. Baska iyo mariinnada baska dheereya uu maro waxaa qaasahaan loogu talagalay inuu dadka ka soo qaado magaalada iyo nawaaxiga shaqooyinka meelaha ugu waaweyn laga shaqeeyo, xoogna saaraya waqtiyada shaqada la bilaabo iyo la dhammeeyo.
- 27 mashruuc nawaaxiga ee saaraan mariinnada xafadaha. Mariinnadaan waxay bixiyaan helitaanka xiriirka gaadiidka oo idil ee qaybo badan ee meelaha aan sidaa loo deggenayn ee adeegyada gaadiidka deegaanka.

- 14 mashruucyo ee taageeraya mariinnada, kuwaaso ka adeegaya deegaannada magaalada ee waddada magaalada ka gudbaysa ee caadi ahaan aan ku xirin xarun deegaaneed ee weyn, sida midka ku yaalla magaalooyinka hoose. Waxaa ayaga loogu talagalay in ay lagu dhammeystirayo laynka mariinada baska magaalada iyo fudududaynayo isku xirnaashaha.

Toban iyo kow mashruuc ee BRT ayaa sidoo kale ugu jira Draft SIP balse aan lagu darin 122 mashruuc ee la qiimeeyay (laynka A waxuu durbadiiba helay dhaqaalihii lagu hawlgalinayey). Jaantuska 2 ayaa muujinaya mashruucyada ku jira Draft SIP ee ujeeddooyin horumarin iyo Jaantuska 3 ee lagu soo bandhigayo mashruucyada sida ah in marriinnada lagu kala sooco.

## Ilaha Qoraalka Hore ee SIP

Tusmada 5 waxay muujinaysaa mashruucyada "sare iyo dhexe" ee ku jira akaanwka Draft SIP oo $72.3 malyan ee dheeraad ah sanadkiiba illaa 2030, kaaso ah koror boqolkiiba 33 ee ka sarreeya miisaaniyadda lagu halwgalayo ee 2015 Metro Transit,  iyo koror ay boqolkiiba 27 ee ee dhacaya 2025. Mashruuciyada waxay abuuri doonaan qiayaastii 16 malyan ee safarro cusub, kuwaaso ah koror boqolkiiba 23 ee ka imaanaya 70 malyan ee safarrada baska 2014. Kororka la qorsheeyey waxuu dhici doonaa ugu badnaan lixda sano ugu horreysa ee waqtiga ay SIP u qabatay, bacdamaa mashruucyada badankood ku dhacayaan inta lagu jiro Wajiga I ama II (Phase I or II). Kaalmada dhexdhexaadka ah ee ku aadaysa rakaabkiiba waa $3.39, kaaso ah mid fiican marka la barbardhigo kaalmada rakaabkiiba ee hadda jirta oo ah $3.35-$5.94, taaso ku xiran kala soocidda mariinnada.

**Tusmada Qoraalka Ilaha SIP**

| | Qoraalka SIP | Waddada BRT | Wadarta |
|---|---|---|---|
| **Wadarta Saacadaha Adeegga** | **640,000** | **269,500** | **909,500** |
| **Basaska Dheeraadka** | **130** | **26** | **156** |
| **Rakaabka Cusub** | **15.8 Malyan** | **12.7 Malyan** | **27.5 Malyan** |
| **Wadarta Kharashka (2014$)** | **$72.3 Malyan** | **$30.5 Malyan** | **$102.3 Malyan** |
| **Kaalmada Dhaqaalaha** | **$53.6 Malyan** | **$18.8 Malyan** | **$71.4 Malyan** |
| **Kaalmada Dhaqaalaha ee Rakaabkiiba** | **$3.39** | **$1.48** | **$2.60** |

Kharashka ku kacaya ee Tusmada kore ku yaalla waxaa ku jira shidaalka, shaqaalaha iyo shaqaalaha taageerada balse kuma ay jirto kharaskha maalgalinta sida iibsashada gaadiidka ama fidinta meelo baska lagu farsmeeyo adeegyadaan dheeraadka ah. Waxaa kaloo meesha ka maqan saamiyada heeerka dheeraadka ee ah boqolkiiba 18 ama isbaddallada adeegyada mashruucyadaan in ay keento adeegyda taageeraya sida Transit Llink ama Metro Mobility. Mashruucyada laguu soo jeedinayo adeegyada maalinka oo idil ee hadda jaalliyadda ka jira waxay hadda u adeegaan oo keliya waqtiydad gaadiidka badanyahay, ama aan gebiahaamba lahayn, iyo xitaa mashruucyada ballaarinaya adeegyada, ay dhicii karto inay saamayn ku yeeshaan adeegyadaan waacitaanka socdaalka (dial-a-ride services).

## Tallaabooyinka Xiga

Metro Transit waxay ku martiqaadaysaa xilliga fikradaha shacabka ee Draft SIP Nofeembar 1-30, 2014. Waxaa jira siyaabooyin kala duwan oo ay rukunka, ururrada jaalliyadda ku salaysan, mudanayasha xafiisyada loo doortay iyo kuwo kale ee daneeya inay bartaan horumarinnada qaaska ah ee qorshaha:

- Shabakadda internetka ee mashruuca: metrotransit.org/sip
- Kulamada iyo dhegaysiyada guud: Metro Transit waxay qaban doontaa shan kulan iyo hal dhegaysi guud ee dhici doona inta u dhaxaysa Nofeembar 5 iyo 18. Waqtiyada, taariikhaha iyo meelaha lagu qaban doono ayaa ku lifaaqaan.
- Macluumaadka ku taxluqa qorshaha waxaa lagu soo bandhigi doonaa maktabyo qaas ah, YouTube iyo warbaahinnada bulshada, in *Connect* (Metro Transit customer newsletter-warqdda wararka rukunka), ogeysisyada la siiyo warbaahinta iyo qalabka xayaysiiyada basaska ku yaalla.
- Metro Transit's Community Outreach Coordinator waa qofka xariirka la ah ururrada jaalliyadaha ku salaysan.

Waxaa jira siyaabooyin fikrado looga dhibto waxa ku saabsan Draft SIP: ka qaybgalidda kulanka, farriin ku reebtid telefoonka ah, 651-602-1500, iimeyl u dirtid sip@metrotransit.org, ama warqad aad karashka boostada wadata fikradda ugu dirtid. Wax ka dhihidda waxaa kaloo loogu diri karaa boostada Metro Transit Service Development, 560 6th Avenue North, Minneapolis, MN 55411. Taariikhda kama dambaysta ee wax ka dhihidda waa Nofeembar 30, 2014.

Shsaqaalaha waxay kaloo qaban doonaan Adeeg Falanqayn Caddaaladeed (Service Equity Analysis) sida loogu sharaxay Title VI. Soo jeedimada horumarada dib ayaa loo eegi doonaa si lagu hubiyo in dadka danyarta ah iyo dadka madow ay si sinnaansho leh ku helayaan nacfiga hrumaryada adeegyada.

Qoraaka Hore ee SIP (Draft SIP) waxbaa laga baddali doonaa taaso ku salaysan fikradaha laga helo xilliga wax ka dhihidda. Met Council waxaa la weydiin doonaa ina ay ogooladaan Qoraalka Kamadambaysta SIP (Final SIP) bilowga 2015. SIP waxa dib loo cusbonaynsiin doonaa 4-5tii sanaba mar si ay u tarjunto isbaddallada guritaanka degganayaasha, hanaanada horumarada cusub iyo hannaanada safarrada loo baahanyahay.